



Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WAR-SAXAAFADEED 029/2009

Raiisul Wasaaraha Soomaliya iyo Sarkaal Sare oo ka tirsan Qarammada Midoobay ayaa furay Shirka Guddiga Heerkiisu Sareeyo

Nayrobi, 23 Oktoobar 2009 - Raiisul Wasaaraha Soomaaliya, Cumar Cabdirashiid Cali Sharmarke, iyo USG-ga u qaabilsan UN-ta Arrimmaha Siyaasadda, Lynn Pascoe iyo Ergaygga Gaarka ah ee Qarammada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya, Ahmedou-Ould Abdallah ayaa ku baaqay in si dhakhso ah lo kordhiyo taageerada ay Bulshada Caalamka siineeyso Soomaaliya.

Isaga oo ka hadlaayo furitaankii shirkii koobaad ee Guddiga Heerkiisu Sareeyo, Raiisul Wasaaraha Soomaliyeed wuxuu yiri, Dowladdu waxay u howlgelaysaa sidii ay dadka ugu qaban lahayd adeegyada asaasiga ah, isla markaasna xiriir wada xaajood ula yeelan lahayd dadka dhex-dhexaadka ah ee doonaya in wada hadal lala yeesho. Hase ahaatee Raiisul Wassarahu wuxuu dalbaday in la joogteeyo taagerada Bulshada Caalamka siineeyso Dawladda.

Figradda Raiisul Wasaaraha waxaa tageeray Mr. Pacoe oo Nayroobi u joogo in uu wada hadal ka galo arrimaha Kenya iyo Soomaliya. Pascoe wuxuu horey u soo booqday waddamada Angola, Burundi, South Africa iyo Uganda.

“Hadda waxaan joognaa wakhtigii wax qabadka, waa la soo dhafay wakhtigii hadalka” ayuu yiri Mr. Pascoe. “Tani waa fursad aad u wanagsan oo lagu bedeli karo xaladii qalafsanayd ee ka jirtay Soomaaliya 18kii sanno ee la soo dhafay”.

Dhamaadkii Shirka waxaa la soo saaray baaq, lagu soo dhaweynaayo xiriirka cusub ee wada-shaqaynta dhexmaridoona Soomaaliya iyo Bulshada Caalamka.

Guddiga Heerka Sare waxaa lagu dhisay qodobka 9 aad ee Heshiiskii Jabuuti si loo dhiiri-gelyo in wada-hadal dhexmaro Dawladda iyo Mucaaradka. Guddiga Asaga oo raacaaya hab cusub aya albaabadiisu u furnaan doonaa wadahadal ayada oo isla markaasna la isugu kenayo Dawladda Soomaliyeed iyo Bulshada Caalamka si loo xaqijiyo helitaanka hab loo wada dhan-yahay ee lagu hirgelinaayo Heshiiska Jabuuti, gaar ahaan dhinacyada la xiriira arrimmaha nabadjelyada, isxukunka, cadaaladda iyo dib-uheshiisiinta, arrimmaha bini’ aadinimada dib-dejinta, dib-udhiska iyo horumarka.